



Agoosto 21, 2020

Waalidiinta/Masuuliyiinta iyo Qoysaska Qaaliga ahoow,

Waxaan doonaynaa inaan ku bilowno hadalkeena inaan idiin mahad celino. Waad mahadsan tihiin dhammaantiin dulqaadkiina joogtada ah intaan ka shaqaynayno dhammaan ogolaanshiyaasha qorshaynta iyo Wasaarada Waxbarashada ee loogu baahan yahay ku laabashada dugsiga iyo shaqada amaanka ah ee shaqaalaha iyo ardayda. Ma ahayn shaqo aad u fudud. Waan ognahay inaad xiiso badan u qabtaan inaad wax badan ka ogaataan waxa la filan karo marka aan dib u furno TDSB aana ardayda dib ugusoo dhawayno dugsiga. Waxaan si wayn uga mahad naqaynaa fahankiina joogtada ah iyo kalsoonidiina intaan shaqada sii wadno. Waxaan samaynaynaa wax kasta oon awoodno si aan qaab waxtar leh ugu dhaqan gelino ku laabashada dugsiga waxaana diirada saaraynaa samaynta waxkasta oo suuragal ah si aan u dhawrno badqabka iyo caafimaadka shaqaalaha, ardayda iyo qoysaska.

Sidaad ogtihiinba, Gudigga maamulayaasha ayaa sameeyay go'aano dhawr ah oo muhiim ah shalay ayna ku jiraan ansixinta \$30 milyan oo maal galin ah si loo qoro 366 macalin oo cusub oo dhigaaya dugsiga hoose si gacan looga gaysto kor u qadista badqabka iyo caafimaadka ardayda iyo shaqaalaha dugsiyada. Shaqaalaha ayaa hadda soo gaba-gabeeyay qaababka waxbarashada dugsigeena sare iyo hoose waxaana sii wadaynaa qorshaynta muhiimka ah iyo diyaar garoowyada muhiimka ah ee aan dib ugu furayno dugsiyada.

Dib u dhaca Furitaanka Dugsiga: Salaasada, Sibteembar 15

Ayadoo uu jiro waqtiga loogu baahan yahay diyaarinta ku laabashada dugsiga, TDSB waxay dib u dhigtay maalinta koobaad ee dugsiga lagu laabanaayo (dugsiga hoose, sare iyo dugsiga oonleenka ah) waxayna ka dhigtay **Salaasada, Sibteembar 15**. Gelitaanka dugsiga ee dhammaan fasalada ayaa intaas kadib loo kala qaybin doonaa sadex maalmood. Waqtigaan dheeraadka ah wuxuu naga caawin doonaa furitaanka dugsiga qaab amaana ah oo nidaamsan. Xog dheeraad ah iyo faahfaahin gaar ah ayaa lala wadaagi doonaa waalidiinta/qoysaska si toos ah waxaana usoo diraya dugsiga cunugaaga kahor maalinta koobaad ee dugsiga.

Tilmaamaha Maaskarada/Gafuur Xirka

Si kor loogu qaado caafimaadka iyo badqabka dugsiyada, dhammaan ardayda iyo shaqaalaha waxaa qasab ku noqon doonta inay xidhaan maaskarooyin/gafuur xir markay joogaan dhismayaasha TDSB iyo basaska dugsiga. Go'aankaan wuxuu waafaqsan yahay shardiga guud ee Magaalada Toronto taasoo ah in qof kasta oo ka wayn da'da maaskarada/gafuur xirka markay joogaan gudaha xarumaha — marka laga reebo dadka qaba sababo caafimaad oo gafuur xirka ka reebaysa. Ayadoo dugsiyadu u diyaarin doonaan maaskarooyin ardayda haddii loo baahdo, waxaa laga doonayaa ardayda inay la yimaadaan ayna xidhaan maaskaradooda/gafuur xirka. Si gaar ahna ardayda da'doodu yartahay, waxaan xaqiijin doonaa inay jiraan fasaxyo banaanka lagu aado, si ardaydu aysan maaskarada u xirnaan saacado badan. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan maaskarada/gafuur xirka ayaa imaan doona dhawaan.



Naqshadaha Waxbarashada

Dugsiyada Hoose (Fasalada Barbaarinta ilaa 8)

Ardayda (ayna ku jiraan kuwa dhigta Waxbarashada Gaarka ah iyo barnaamijyada Barashada iyo Balaarinta Faranjiga) ayaa dhigan doona dugsiya 5 maalmood asbuucii, ayagoo hal koox ku jiraaya maalinta oo dhan, ayna ku jirana xiliyada nasashada iyo qadada. Habraacyada kor u qaadista caafimaadka iyo badqabka ayaa la diyaarin doonaa, ayna ku jiraan xajmiyada fasalka ee la yareeyay si gacan looga gaysto kor u qaadista kala fogaanshaha dadka. Bulshooyinka dugsiyada Hoose ee ku yaala Toronto ee ay xogta caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka Dawlada ee Toronto muujinayso inay jirto khatar badan oo ah in la qado COVID-19 ayaa la yarayn doonaa tirada ardayda fasalka oo lagasii yarayn doono dugsiyada kale ee hoose. Booqo webseetka si aad u hesho xog dheeraad ah, ayna ku jiraan faahfaahinta muhiimka ah ee ku saabsan [tirada ardayda dhigan doonta fasalada dugsiya hoose](#).

Dugsiya Sare (Fasalada 9 ilaa 12)

Ardayda (ayna ku jiraan kuwa waxbarashada gaarka ah iyo kuwa barta barnaamijyada Barashada iyo Balaarinta Faranjiga) waxaa la siin doonaa waxbarashada gudaha fasalka maalmo isdhaaf ah iyo qaab oonleen ah (layf ah, oonleen ah) iyo sidoo kale qaab fogaan barashada (shaqo madax banaan) maalin kastana wax ku baranaaya qaababka caafimaadka oo kor loo qaaday ayna ku jiraan fasalada oo tirada dhiganaysa la yareeyay si gacan looga gaysto kordhinta kala fogaanshaha dadka. Wixii macluumaad dheeri ah, fadlan booqo [webseetka](#).

Waxbarashada Oonleenka ah (Barbaarinta ilaa Fasalka 12)

Waalidiinta doonaaya in cunugoodu wax barto asagoo guriga jooga ayaa dooran kara dookha waxbarashada oonleenka ah. Wixii macluumaad dheeri ah, fadlan booqo webseetka. [Dugsiya Hoose](#) iyo [Sare](#).

Diiwaan Galinta Waxbarashada Tooska ah ama Oonleenka ah

Sidaad ogtihiinba, waxaan biloownay diiwaan gelinta hore biloowga bishaan si aan u ogaano ardayda qorshaysay inay dhigtaan dugsiya bisha Sibteembar iyo ardayda qorshaysatay inay si buuxda oonleen wax ku bartaan (hooyga). Ilaa xiligaas, waxaa jiray isbadalo badan oo ku dhacay qaababka waxbarashada xog dheeraad ah ayaana la heli karaa si ay uga caawiso waalidiinta gaarista go'aankaan. Sidaas awgeed, Arbacada asbuuca soo socda, TDSB waxay ka codsanaysaa waalidiinta/masuuliyiinta ayadoo iimeelka kula xariiraysa inay gaaraan go'aanka kama danbaysta ah ayna carruurtooda ka qoraan dugsiya ama ay doortaan inay oonleen wax ku bartaan ayadoo ka qaybgalaaya *Dugsiya Oonleenka ah*. Iimeelka ayaa ka koobnaan doona lifaaq gaar ah oo ku gaynaaya foomka diiwaan gelinta arday kasta.

Waalidiinta/masuuliyiinta ay u dhigtaan dugsiyada arday badan ayaa heli doona hal iimeel cunug kasta waxaana laga doonayaa inay diiwaan gelin gaar ah u sameeyaan cunug kasta. Diiwaan gelinta oonleenka ah ayaa lagu heli doonaa labaatn luuqadood oo kaladuwan.



Aad ayay muhiim u tahay in dhammaan waalidiintu/masuuliyiintu buuxshaan diiwaan gelintaan oonleenka ah, xataa kuwii horay uga jawaabay diiwaan gelintii hore ee wicitaanka taleefanka asbuucii lasoo dhaafay. Kaliya waalidiinta/masuuliyiinta aan haysan ciwaanka iimeelka oo diiwaanka ku jira ama aan buuxin diiwaan gelinta oonleenka ah waxay heli doonaan diiwaan gelin lagu siinaayo wicitaanka taleefanka si ay u sameeyaan xulashadooda. Wixii xog dheeraad ah aadna wax uga ogaato [dookhyada kaladuwan ee diiwaan gelinta](#), waxaan ku boorinaynaa dhammaan waalidiinta/masuuliyiinta inay booqdaan webseetak TDSB.

Arbacada, Agoosto 26: limelka loo diray dhammaan qoysaska/masuuliyiinta iyo diiwaan gelinta ayaa furmaaya

Sabtiga, Agoosto 29: Diiwaan gelinta ayaa xirmaysa

Talaabooyinka Xiga

Waxaan sii wadaynaa inaan ku wargelino qoysaska aana xog ka siino maalmaha soo socda. Waxaan u diyaarinaynaa dugsiyada inay soo dhaweeyaan shaqaalaha iyo ardayda. Talaabada koobaad, Tilmaamaha Barnaamijka iyo Shaqada ayaa hadda la dhamaynayaa waxaana lala wadaagi doonaa Maamulayaasha/Ku xigeennada Maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsiga asbuuca soo socda. Si shaqaalaha iyo ardaydu ugu laabtaan dugsiga si amaan ah, waxaa jiro waxyaabo badan oo laga fiirsanaayo iyo balaarin lagu samaynaayo xarumaha dugsiga shaqaalaha dugsiga ayaana u baahan waqti ay ku bartaan shuruudahaan ayna ku bilaabaan diiwaan gelinta kahor intaan ardaydu ku laaban dugsiga. Xog badan ka ogoow [tilmaamaheena caafimaadka iyo badqabka](#) dugsiga ood ka helayso webseetka.

Waxaan idin ka codsanaynaa inaad sii dulqaadataan inta shaqadaan muhiimka ah la wado. Fadlan xasuusnoow in macalimiinta iyo shaqaalaha dugsigu ay sidoo kale aad u sugayeen xogta iyo faahfaahinta taasoo u sahlaya inay qorsheeyaan Sibteembar. Waqti ayay qaadanaysaa in loo diyaar garoobo lana dhameeyo qorshayaasha dugsiga iyo kuwa gaarka u ah fasalka. Fadlan ogoow in maamulayaashu ay bilaabi doonaan inay shaaciyaan xog dugsiga ku saabsan oo toos loola wadaagaayo qoysaska sida ugu dhakhsaha badan. Waan ognahay in aad qabtaan su'aalo badan iyo walaacyo shaqaaluhuna waxay sii wadayaan inay sameeyaa waxay awoodaan si ay idiin siiyaan xogta muhiimka ah ayna idiin la socodsiiyaan wixii jira.

Waan ka midaysanahay arintaan waxaana sheegi doonaa yoolka guud ee xaqiijinta caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha, ardayda iyo qoysaska. Waxaan doonaynaa in dugsiga ku laabashadu noqoto mid fudud sida ugu macquulsan qof kasta waxaana u baahanahay inaan siiwadno wadashaqaynta si ay arintaan u dhacdo.

Daacad kuu ah,





A handwritten signature in black ink, appearing to read "Carlene Jackson".

Carlene Jackson
Agaasimaha Waxbarashada

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Alexander Brown".

Alexander Brown
Gudoomiyaha

